

XEERKA n. 148 rep.

MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

MAAREEYAHA

MARKUU ARKAY sharciga lambar 4 soona baxay nobembar 1951, n. 1031, kaas oo ansaxinaya heshiiska ilaalinta dhulka Soomaaliya ee hoos yimaada MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA oo siiyanaya awood fulineed buuxda;

MARKI LA AQOONSADAY fursadda in loo asaaso dowro diyaargarow ah kuwa doonaya in ay ka shaqeeyaan xafiisyada Garsoorka ee degaanka.

WUXUU XEEREYAY:

Qod. 1.

Dowrooyin loogu diyaar garoobayo ayaa laga sameeyay Muqdisho dadka doonaya inay ka shaqeeyaan xafiisyada Garsoorka ee degaanka.

Qod. 2.

Dadka degaanka ah ee haysta ugu yaraan shahaadada dugsiga hoose ama shahaadada dowrada saddexaad ee asaasiga ah ee dadka waaweyn ayaa ka qaybqaadan kara dowrada, ama imtixaanka gelitaanka gudba oona muujiya inay si fiican ugu hadli karaan una qori karaan luqadaha Talyaaniga iyo Carabiga, gaarayna da'da sideed iyo toban jir. Ogeysiiska soo socda ayaa qeexi doona qaababka loo galayo imtixaannada.

Qod. 3.

Garsooraha Soomaaliya waa Maamulaha dowrada.

Shaqooyinka waxbarida waxaa aaminey amarka uu soo saaray Maareeyaha markii u arkay jeedinta Garsooraha Soomaaliya, saraakiisha ama shaqaalaha Maamulka inuu haysto dibloomada dugsiga sare.

Qod. 4.

Dowrooyinka waxa ay ka kooban yihiin casharro akhris ah iyo layliyo shaqo ah, dowradu waxa ay socotaa saddex bilood, casharradana waxaa la qabtaa galabihii, saacado iskucelcelis ahaan todobaadkii aan ka yarayn saddex.

Layliga shaqo ayaa lagu qabtaa xafiisyada xarunta cadaaladda, casharrada akhriska dowradana waxa lagu galaa dugsii ku yaal Muqdisho.

Qod. 5.

Casharradu waxa ay diirada saarayaan maaddooyinka soo socda:

- 1) fikradaha sharciga madaniga iyo kan dambiyada;
- 2) Waxyaabaha ku saabsan nidaamka madaniga iyo kan dambiyada;
- 3) Nidaamka garsoorka ee Soomaaliya;
- 4) Adeegyada xarunta.

Qod. 6.

Imtixaannadu waxay dhacaan dhamaadka dowlada.

Shuruucda imtixaannada waxaa lagu dhisi doonaa wareegtada Maareeyaha, isaga ayaa xataa magacaabaya Guddiga.

Imtixaannadu waxay ka koobnaan doonaan imtixaan qoraal Talyaani ah iyo imtixaan afka ah oo lagu qaadayo dhammaan maaddooyinka wax lagu barto.

Qod. 7.

Macallimiinta waxaa la siiyaa bil kasta iyadoo ay ka qaataan 20 Sh. So. bil kasta ah saacad kasta oo toddobaadkii.

Xubnaha Guddiga imtixaanka waxaa la siiyaa lacag isku mid ah iyo si la mid ah sida imtixaanada qalinjabinta dugsiga dhexe.

Qod. 8.

Kharashaadka dowlada wareegtadan lagu soo oogo ayaa la saaraa qod 67 mar labaad miisaaniyad sannad maaliyadeedka 1952/1953.

Muqdisho, 30 seteembar 1952.

p. MAAREEYE
Canino

Arkay diiwaangelinta n. 847
16 oktoobar 1952.